

# Qandhada Pontiac (Pontiac Fever)

## Maxay Tahay Qandhada Pontiac?

- Qandhada Pontiac waa qandho aan darneyn oo leh calaamadaha hargabka oo kale taas oo ay keento bakteeriyyada *Legionella*.
- Waa nooc ka mid cudurada la xiriira *Legionella* oo ka halis yar cudurka Legionnaires, kaas oo ah nooc halis ah oo sambabada ku dhaca (infekshanka sambabada) oo ayna keento bakteeriyyada *Legionella*.
  - Qandhada Pontiac isuma bedesho cudurka oof wareenta (nimooniyada).
- Qandhada Pontiac waxaa magac loo bixiyay markii ugu horreysay ee cudurku ka dillaacay Pontiac, Michigan sanadkii 1968.

## Sidee buu u faafaa?

- Qandhada Pontiac waxay ku faaftaa marka neefta la qaato oo ay neeftaasna soo raacdoo dhibco yaryar oo ah biyo ay la socoto bakteeriyyada *Legionella*.
- Bakteeriyyadu waxay khatar ku tahay caafimaadka bini'aadamka marka ay korto kadibna ay faafiyaan aaladaha abuura biyaha hawada la socda sida:
  - qubeyska biyaha kulul la isku uumiyo (hot tubs)
  - qasabada/tuubada qubeyska
  - ilaha biyaha qurxinta (decorative fountains)
  - xarumaha la isku qaboojiyo
- Dadku jiro ayey ka qaadi karaan haddii ay neef ahaan u qaataan dhibco yar oo biyo ah oo ay ku jirto bakteeriyyada.
- Qandhada Pontiac kuma faafsto marka dadka jirkoodu is taabto.

## Maxay yihiin calaamadaha lagu garto?

- Calaamadaha ugu caansan ee lagu garto waa:
  - Qandho
  - Madax xanuun
  - Murqo xanuun
- Sida guud calaamadahaan waxay soo if baxaan dhawr saacadood gudahood ilaa 3 maalmood ka dib marka ay dadka soo gaarto bakteeriyyada *Legionella*.

## Yaa khatarta sare ugu jira?

- Dadka oo dhan da' kasta oo ay jiraan waxay halis ugu jiraan qandhada Pontiac.
- Tani way ka duwan tahay cudurka Legionnaires, kaas oo ay dadka waaweyn iyo dadka qaba xaaladaha caafimaad qaarkood ay yihiin dadka halista sare ugu jiraan cudurka.

## Sidee loo baaraa?

- Caadi ahaan qandhada Pontiac lama baaro ama looma sheego MDH.
- Qandhada Pontiac waxaa sida caadiga ah lagu ogaadaa iyadoo lagu salaynayo isku xirnaanshaha jirrooyinka ee waqtii ama goob lagu arko iyada oo lagu guda jiro baaritaanka cudurkii oo dillaacay.
- Cudurada Legionnaires oo dillaaca mararka qaarkood waxay sidoo kale ku jiri kara kiisas qandhada Pontiac.
- Sida badan laguma ogaado baaritaanka shayaarka.

## Sidee loo daaweyaa?

- Qandhada Pontiac sida guud waa laga bogsoodaa iyada oo aan wax daawo antibiyootig ah la qaadan. Dadka intooda badan waxay ku bogsadaan toddobaad gudihiis.

## Sidee looga hortagaa?

- Kahortagga qandhada Pontiac waxay u baahaan tahay talaabooyin la mid ah tallaabooyinka ka hortagga cudurka Legionnaires.
- Iyadoo ku xiran xaaladaha deegaanka, noolaha Legionella wey ku tarmi karaan kuna faafi karaan noocyoo badan oo hababka biyaha sii daaya ee bini'aadamku sameeyo sida qubeyska biyaha kulul la isku uumiyo (hot tubs), madaxyada qasabada qubeyska, qasabadaha saxanka faraxalka, ilaha biyaha qurxinta (decorative fountains) iyo biyaha jardiinooyinka lagu qurxiyo, haamaha biyaha kulul iyo kuleyliyeasha, nidaamyada tuubooyinka waaweyn howshoodu culus tahay, iyo xarumaha la isku qaboojiyo. (qaab-dhismeedyada ay ku jiraan biyaha iyo marawaxada oo loo isticmaalayo hababka

qaboojinta ee dhismaha ka dhexeeya ee dhismayaasha ama warshadaha wax sameeya).

- Qaboojiyeasha guryaha iyo kan baabuurka ma isticmaalaan biyaha si ay hawada u qaboojiyaan, markaa wax khatar ah uguma jiraan koritaanka *Legionella*.
- Furaha ka hortagga cudurka waa in la yareeyo khatarta koritaanka *Legionella* iyo faafitaanka marka la dhisayo nidaamyada biyaha iyo qalabkooda iyada oo loo marayo xeelado dayactir oo wanaagsan. Xeeladahan waxaa ka mid ah la socodka heerkulka biyaha iyo heerarka jeermiska dila iyo ka hortagga xaaladaha biyaha fadhiya.
- Mulkiilayaasha iyo maareeyayaasha dhismayaasha waa in ay sameeyaan oo ay hirgeliyaan barnaamijka maaraynta biyaha iyaga oo isticmaalaya heerarka ASHRAE (American Society of Heating, Refrigerating and Air-Conditioning Engineers [Kooxda Ingineerada Maraykanka ee Kuleyliyaha, Qaboojiyaha iyo Qaboojiyaha Hawada]).

Minnesota Department of Health  
Waterborne Diseases Unit  
PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164  
651-201-5414  
[health.water@state.mn.us](mailto:health.water@state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

01/2024

*Si aad xogtan ugu hesho qaab sidaan ka duwan, wac: 651-201-5414.*